

## **Kaalmada afka hooyo, barashada afka hooyo iyo waxbarasho ka caawiye**

- Afka hooyo micne weyn buu u leyahay ilmaha/ ardayga aqoonsigiisa iyo kalsoonidiisa.
- Afka hooyo waa bilowga ilmaha/ardayga awoodiisa wax barasho
- Ilmaha/ardayga way u fu'dudaan inuu barto luqad kale iyo madooyin kale..
- Faa'iido weyn bay u tahay wadanka in ay dadka luqado badan yaqaaniin

### **Waa maxay kaalmada luqada hooyo?**

Marka la eego dugsiga xannaanada iyo barbaarinta caruurta qorshiiisa waxbarasho waa inuu ilmaha ku hadla luqad kale oo aan iswidhish ahayn lasiyo fursad loo siiyo inuu barto luqadiisa hooyo. Macalinka luuqada hooyo wuxuu la kulmaya caruurta asbuuc kasta hal mar. Iyada ama isaga iyo ilmaha waa inay isku dhaqan yihiin ama isku meel ka soo jeedaan. waa lala ciyaaraya, lala heesayaa, wax baa lala sawirayaa, ciyaar baa lala ciyaaraya, wax baa la jarjaraya lana isku dhejinaya, waxaana lala akhriyayaa sheekoooyin caruureedka ah afka hooyo. Macalinka afka hooyo waa inuu xataa sameeyo ciyaar iyo hees oo ciyaalka dhamaantood ka qayb qadanayaan taas oo sharaxaad ka bixinaysaa dhaqanka iyadoo sidoo kale dhiirri gelinaysa aqoonsigiisa ilmaha wax la barayo. Baaritaan la sameyay waxaa lagu o'gaaday in ilmaha tababar ku sameeyaa afkiisa hooyo marka uu ku jiro dugsiga xannanada iyo barbaarinta caruurta ay hadhow u fu'dudahay waxbarashada dambe. waxay noqonaysaa buundo isku xirta dugsiga xannaanada iyo luqadda guriga lagaga hadlo. Tranemo waxaa laga helaa luqadda albaaniga, carabiga, bosniga, serbiga, kreyshiga, romani, somaliga, Taylaandiiska, luqadda faraha la iskala hadlo iyo ruushka.

### **Waa maxay barashada afka hooyo?**

Barashada afka hooyo waa maado gooni ah oo lagu barto dugsiga hoose iyo dugsiga sare. Hadafka laga leeyahay waa in ilmuu ka faa'iidaysto waxbarashada iskuulka waana inuu isla markaas horumarin ku sameeyo labadiisa luqadood iyo xirfaddiisa. Shaqada waa inay noqoto mid horumarin ku samaynaysa ardayga iyo shaqsinimadiisa, noqonaysana mid korna u qaadaysa qiimaha ardayga. Macalinka baraya ardayga afka hooyo badanaa waa inuu noqdo mid ay ardayga isku dhaqan ka soo wada jeedaan. Macalinka baraya ardayga waa inuu yaqaano luqada iswidhishka ah waana inuu aqoon u leyahay wadanka iyo bulshada iswidhan. waxbarashada afka hooyo waa mid aan khasab ahayn uuna dooranayo qofka ilmaha ka masuulka ah, in ilmaha la baro afkiisa

hooyo. Arday kasta oo gurigooda lagaga hadlo luuqad kale oo aan ahayn luqada iswidhiska waa heli karaa in la baro luqadda afkiisa hooyo. Xataa luqadaha laga tirada badan yahay oo aan malinkasta ilmaha uusan ku hadlin guriga waa in la bara ilmaha luqaddaas. Xataa ilmaha la soo korsaday oo luqad kale yaqaan aan ahayn tan iswidhishka xaq buu u leyahay in la caawiyo lana baro luqadiisa afka hooyo. Magalada Tranemo ku dhowaad waxaa jooga ilaa 200 arday oo haysta luqad kale oo aan ahayn luqadda iswidhishka kuwaasna ku dhowaad 125 way bartaan luqaddooda afka hooyo. Sanad dugsiyeedkii 2010/2011 waxaa la baran karay luqadahan: albaaniga, carabiga, bosniga, serbiga, kureyshiga, romaniga, soomaaliga, taylaandiska, jermalka, polandiiska, finladiiska iyo ruushka. waa inay jiraan ugu yaraan 5 arday oo codsanaya isku luuqad iyo macalin ku haboon markaas magalada Tranemo waa ansixinaysaa luqadaas in la baro ardayda. Luqadaha laga tirada badan yahay sida samiska, meän kieli, Romani, finladiiska iyo jiddisch waxaa ku filan in uu codsado hal arday oo keliya si ay magaladu u ansixiso.

## **Waa maxay waxbarashada ka caawiye afka hooyo?**

Ilmaha wadanka ku cusub oo aan garanayn luqad ku ka caawiya oo ugu turjuma afkiisa hooyo.

### **Abaabulka**

Baaritaanka luqadda siyaabo kala duwan baa looga abaabula iskuulka.

- Luqad doorasho, luqadaha hore u maray oo ah maado gaar ah oo qorshe leh
- Luqada afka hooyo, maado gaar ah oo leh qorshe.

Baritaanka afka hooyo oo ardayga doortay ama iskuulka u dooray Baritaan afka hooyo oo aan lahayn qorshe sacadeed.

filan oo uu kula qabsado ardayda kale oo baranaysa iswidhishka wuxuu heli karaa qof ugu sharaxa luqadiisa afka hooyo.

Waalidka iyo iskuulka aaya ka wada hadlaya arinkaas in ilmaha loo qabto qof luqada ka caawiya oo ugu turjuma afkiisa hooyo. gudoomiyaha dugsiga aaya ugu dambeyn go'aaminaya in ilmaha la siiyo qof waxbarashada